

Offleenka App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI

Waa maxay Offleenka App-ka Taleefonka?

Offleenka App-ka Taleefonka wuxuu kuu sahlayaa, Bixiye ahaan, inaad ka sameyso ilaa iyo 5 waqti gelin App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI ilaa iyo 5 maalmood oo isku xigta adiga oo aan u baahanin inaad isticmaasho khadka lafta teleefonka ama WiFi.

Sideen u bilaabaa isticmaalka Offleenka App-ka Taleefonka?


Waxaad u baahan doontaa khadka lafta taleefonka ama WiFi si aad u bilowdo. Marka ugu koowaad ee aad OR PTC DCI ka soo gasho aalada gacanta (sida tablet ama taleefon casri ah) adiga oo khadka uu kuu furan yahay, OR PTC DCI waxay si ootomaatiga ah u diiwaangelin doontaa aaladaada. Waa inaad isticmaasho aaladan si Offleenka App-ka Taleefonka u shaqeeyo.

Miyaan u diiwaangelin karaa Offleenka App-ka Taleefonka hal aalad ka badan?

Offleenka App-ka Taleefonka waxay ku shaqeyn doontaa oo kaliya halkaaga aalad ee diiwaangashan. Waxaad lahaan kartaa kaliya hal aalad oo diiwaangashan, halki aaladna waxaa loo diiwaangelin karaa hal adeegsade. Haddii aad rabto inaad baddesho aalada diiwaangashan, fadlan la xiriir Xafiiska Deegaankaaga si laguu caawiyo.

Aaladeyda way diiwaangashan tahay. Hadda maxaa xiga?

Inta aad ku jirto App-ka Taleefonka OR PTC DCI, app-ka taleefonka wuxuu raadin doonaa khadka internetka. Haddii khadka internetka la waayo, app-ka taleefonka ayaa si ootomaatig ah iskuugu baddeli doona Offleenka App-ka Taleefonka. Boor “Offline” (“Offleen”) qoraya ayaa ka muuqan doona xaga kore ee shaashada App-ka Taleefonka marka ay kaaga wuxuu soo saari (Qorida Waqtiga Bilowga sifooyinka iyo heli karo.




offleen tahay. Dashboard-
doonaa badhanka Clock In
Shaqada). Dhammaan
macluumaadka kale lama

Maxaan ka sameyn karaa Offleenka App-ka Taleefonka?

Adiga, Bixiye ahaan, ayaa ku qori kara waqtiga bilowga iyo dhamaadka shaqada Offleenka App-ka Taleefonka. Tan waxaa ka mid ah:

- Gelidda App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI
- Doorashada Clock In (Qorida Waqtiga Bilowga Shaqada)
- Doorashada Clock Out (Qorida Waqtiga Dhamaadka Shaqada)
- Dhameystirida Qorida Waqtiga Dhamaadka Shaqada
- Raacinta qoraalada iyo hawlaha marka la qorayo waqtiga dhamaadka shaqada
- Ka bixida App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI

Sababo amni aawadood, macluumaadka qaarkiis waa la soo gaabin doonaa ama eber ayaa laga dhigi doonaa. Waxaad arki doontaa magaca koowaad iyo magaca awoowga ee Macmiilka oo kaliya. Ma awoodi doontid inaad aragto haraaga Saacadaha La Oggolaanashaha (inta saacadood ee ka hadhay muddada adeegga).



Back

Clock In

Offline

Clock In Time: 02:56 PM (PT)

Confirm Clock In

Client Name: C Training
Service Code: Hourly ADL/IADL-1


Sideen ugu qori karaa waqtiga bilowga iyo dhamaadka shaqada Offleenka App-ka Taleefonka?

Wax iska baddelayo ma jiro sida aad ugu qoraysidi waqtiga bilowga iyo dhamaadka shaqada Offleenka App-ka Taleefonka. Raac talaabooyinkaaga caadiga ah si aad u geliso waqtiga.

IMuddo intee la'eg ayaan offleen ahaan karaa?

Aalada waxay offlayn ahaan kartaa oo kaliya 5 maalmood oo isku xiga. Waxaad sameyn kartaa oo kaliya ilaa iyo 10 xareyn oo offleena ka hor inta aadan onlay ku noqonin mar kale. Haddii aad offleen tahay wax ka badan 5 maalmood ama aad iksu daydo inaad sameyso wax ka badan 10 xareyn, waxaa lagu soo diri doonaa farriin oraneyso: "Inta ugu badan ee aad sameyn karto xareynta offleebnka ah ayaad dhaaftay."

Ka guji Confirm (Xaqiiji) digniintan:




Ma awoodi doontid inaad qorto waqtiga bilowga shaqada mar kale ilaa aad ka gasho app-ka taleefonka OR PTC DCI adiga oo aaladaada uu khadka imtarnetka ku xiran yahay.


Maxaa dhacaya markaan galo app-ka taleefonka markaan dib onlayn u noqdo?

Waqti gelintaada waxaa lagu keydin doonaa App-ka Taleefonka intaad offleen tahay. Markay aaladaad onaly ku soo laabato, waxaa lagu soo diri doonaa digniin qoraysa: "Dib ayaad onlayn u soo noqotay. Fadlan guji confirm (xaqiiji) si aad iskuugu toosiso xogtaada."

Ka guji confirm (xaqiiji) digniinta si aad ugu xareyso waqti gelintaada OR PTC DCI:



Inta ay waqti gelintaada soo kaceyso, waxaad arki doontaa farriin qoreysa: “Xogtaada offleenka ayaa la isku toosinayaa. Fadlan ha xirin internetka ama ha dilin app-ka. Haddii kale xogtaada way lumeysaa.”




Waxay qaadan kartaa muddo yar si ay waqti gelintaada u soo xarrooto. Marki ay tani dhamaato, waqti gelintaada waxay ka soo muuqani doontaa qeybta Entries (Waqti Gelinta) ee safkaaga liiska hoos u baxa.

Muhiim: Waqti gelintaada waa qasab in lagu xareeyo OR PTC DCI si mushahar loogu siiyo. Waa inaad soo xareeyso waqti gelintaada ka hor dhamaadka mudda kordhinta lagu sheegay Heshiiska Gorgortanka lagu Gala si mushahar lagu siiyo xilli mushahareedka hadda socda.

Waxaan cillad kala kulmayaa khadka internetka; Maxaan sameeyaa?

Marka aad isku dayeyso inaad isticmaasho App-ka Taleefonka OR PTC DCI, waxaa laga yaabaa inaad aragto cillad qoreysa: “Fadlan hubi Khadkaaga Intarnetka.”

Ka guji Confirm (Xaqiiji) digniinta:



Haddii ay tani dhacdo, wax ayaa ka qaldan diiwaangelinta aaladaada. Wac Xafiiska Deegaankaaga si lagu caawiyo. Waqtigan la joogo, waa inaad ku xiran tahay intarnet si aad u gasho OR PTC DCI.

Xusuusnoow: Aalada ayaa lgu diiwaan gelin karaa kaliya hal adeegsade. Haddii uu qof aaladaada ka galo OR PTC DCI, aalada waxaa laga yaabaa in lagu diiwaangeliyo adeegsadahaas Offleenka App-ka Taleefonka.

Waxaan u baahanahay caawin dheerad ah!

Wixii caawin dheerad ah ee ku saabsan Offleenka App-ka Taleefonka, ka wac Miiska Caawinta DCI lambarka 1-855-565-0155, ama iimayl ugu dir ORPTCSupport@dcisoftware.com.

Si lagaaga caawiyo arrimaha diiwaangelinta aalada iyo cilladaha khadka intarnetka, cawac Xafiiska Deegaankaaga, ama iimayl ugu dir PTC.Support@dhsosha.state.or.us.